**UNITE HERE Waxay kuu Fidiyaan Ogeysiis ah Dhacdooyinka Ammaanka Xogta ee Saameeya Xubnaha Guddiyada Maxaliga iyo Miisaaniyadda Caafimaadka Qaar**

UNITE HERE waxay fidinayaa ogeysiis ku aadan dhacdooyinka dhacay kaas oo saamayn kara xog ku saabsan asturnaanta xubnaha qaar ee ururrada maxaliga iyo miisaaniyadda caafimaad ee UNITE HERE la xiriira.

**Maxaa Dhacay?** Taariikhdu markay ahayd 20ka bisha Oktoobar, 2023, waxaan ogaanay in qolo saddexaad oo aan la ogolayn cida ay yihiin nidaamkeena kombiyuutarrada ay soo gashay. Markaas ka dib, waxaan qaadnay tillaabooyin aan ku joojinayno gelitaanka ama helida iyo kordhinta amniga. Sidoo kale waxaan keennay khubaro dhanka ammaanka internetka ah si ay u baaraan qaabka iyo baaxadda waxa dhacay.

**Maxay yihiin Macluumaadka lagu Lug Yeeshay?** Ma jiraan wax caddaymo sheegaya inay jiraan wax xatooyo aqoonsi ama khiyaamo dhacdada la xiriirta, shakhsiyaadkii xogtooda ay dhici kartay inay soo gaartay ee ku jiray nidaamka wakhtigaas ayaan la socodsiinaynaa. Waxay u badan tahay in qolada seddexaad ay heleen xog ay ku jiraan magacyada, lambarada soshal sekiyuuritiga shatiga darawalnimada, lambarada aqoonsiga gobolka, lambarada diiwaangelinta shisheeyaha, lambarada aqoonsiga qabiilka, lambarada baasaboorka, shahaadooyinka dhalashada, taariikhda dhalashada, shatiyada guurka, saxiixyada, xogta koontooyinka lacagta, iyo xogta caafimaadka.

**Maxay ka Qabanayaan UNITE HERE.** Asturnaanta, qarinta, iyo amniga xogta aan gacanta ku hayno ayaa ah waxa mudnaanta ugu sarraysa ee aan siino. Markii dhacdadan la oggaaday, markiiba waxaan bedelnay furaha sirta ee kombiyuutarradeena, waxaanu ku darnay furo sir oo dheeraad ah oo ammaanka sugaya, waxaan baarnay xogta ay dhici karto inay halis ku jirto. Sidoo kale waxaan ku wargelinay waaxda sharci fulinta. Waxaan sii wadnaa inaan ka shaqeyno oo aan hoos u dhigno fursadaha ah inaysan tan mar kale dhicin. Waxaa intaa dheer, waxaan fidinnaynaa la socoshada kareeditka (credit monitoring) iyo la socoshada adeegyada ilaalinta xatooyada aqoonsiga iyada iyada oo IDX loo marayo.

**Waxa Adiga aad ka Qaban Karto.** Si adiga aad uga feejignaato xatooyo dhanka aqoonsiga iyo khiyaanada, waxaad si adag aan kuugu talinaynaa:

- Inaad dib u eegid aad ku samayso qoraallada (statements account) koontadaada iyo warbixinnada kareeditkaaga sida aad uga oggaato waxyaabo ku tuhun geliya ama qaldaad ay ku jiraan.
- Dib u eeg lifaaqan la soo raaciyay *Talaabooyinka aad Qaadi Karto si Aad Gacan uga Geystado Dhowrista Xogtaada* si aad u barato Talooyin waxtar kuu leh oo ku saabsan talaabooyinka aad qaadi karto si aad uga ilaaliso si xun u isticmaalka xogta suurtagalka ah.
- Isku qor adeegyada kormeerka kareeditka aan adiga ku siineyno.

**Wixii Xog oo Dheeraad ah.** Waan fahamsanahay in ay dhici karto in aad qabto su'aalo aan weli laga hadlin. Haddii aad qabto su'aalo dheeraad ah, fadlan soo wac khadka gargaarka gaarka ah ee IDX, maalmaha Isniinta ilaa maalinta Jimcaha laga bilaabo 9 subaxnimo - 9 galabnimo wakhtiga afrikada bari, ama fariin qoraal ku soo dir UNITE HERE 275 7th Avenue, 16th Floor, New York, New York 10001. UNITE HERE waxa ay ku talinaysaa in shaqsiyaadka suurtagalka ah ee ay dhici karto inuu saameeyay ay tahay inay raacaan tallooyinka ku qoran warqadda la soo raaciyay oo ay heleen oo ayna la xiriiraan xarunta wicitaanka haddii ay qabaan wax su'aalo ah.

## TALAABOOYINKA AAD QAADI KARTO SI AAD GACAN UGA GEYSTADO DHOWRISTA XOGTAADA

**Isku-qor La Socoshadaa Kareeditka/Aqoonsiga**

1. **Websaayi iyoIsku-qorista.** Tag https://app.idx.us/account-creation/protect oo raac tilmaamaha isku-qorista adiga oo isticmaalaya Xeerka Isku-Qorista ee lagu soo qoray xagga kore ee warqadda.

2. **Samayso la socoshada kareeditka** waxaa laguu siiyay oo ay qayb ka tahay xubin ka noqoashada ilaalinta aqoonsiga (identity protection membership) ee IDX. La socoshada lagu siiyay ee la socota xubinimada waa in la samaystaa si ay kuugu shaqayso. Fiiro gaar ah: Si adeeggan aad u isticmaasho waxaad u baahan tahay inaad horey u la'hayd kareedit oo aadna heli kartaa inaad gasho kombiyuutra iyo interneet. Haddii aad caafimaad u baahan tahay, IDX ayaa ku caawin doonta.

3. **Telefoon.** IDX kala xiriir 1-888-869-9523 si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan dhacdadan oo aad kala hadasho wakiilo aqoon u leh talaabooyinka ku haboon ee la qaado si loo ilaaliyo aqoonsigaaga kareeditka.

4. **La soco kareeditkaaga warbixinta ku qoran**. Waxaan kugula talineynaa inaad feejignaato adiga oo la soconaya warbixinnada koontadaada ku qoran iyo adiga oo la soconaya warbixinnada kareeditka ku qoran. Marka loo eego sharciga dowladda federaalka, waxaad sidoo kale xaq u leedahay 12 bilood oo kasta inaad hesho hal nuqul oo bilaash ah oo ah warbixintaada kareeditka oo ka mid ah saddexda shirkadood ee waaweyn ee ka warbixinta deynta. Si aad u hesho warbixinta kareeditka ee sannadlaha ah oo bilaashka ah, booqo bogga interneetka ee www.annualcreditreport.com ama wac 1-877-322-8228. Waxaa laga yaabaa in aad rabto in dalabaadkaga aad ku rogrogto si aad u hesho warbixin bilaash ah mid ka mid ah saddexda shirkadood ee kareedit biiruuga afartii biloodba mar.

Haddii aad ogaato ama ay jiraan wax tuhun kugu abuura oo aadna isku qortay adeegga ilaalada xogta shaqsi ee IDX, iyaga isla markiiba ogeysii adiga oo kala xiriira ama wacaya ama bogga interneetka ee IDX ka galaya oo buuxinaya codsiga caawinaada.

Haddii aad gudbiso ama soo dirsato codsi caawinaad ama aad soo sheegto dhaqdhaqaaq tuhun, waxaa kula soo xiriiri doona xubin ka tirsan kooxdayada Daryeelka Aqoonsiga kuwaas oo kaa caawin doona inaad ogaato sababta keentay waxyaabaha tuhunka dhaliyay. Haddiiba ay dhacdo in in aad dhibane u noqoto oo aqoonsigaaga shaqsi lagaa xado oo ayna ugu wacnaanto oo dhacdadan sabab u noqoto, waxaa lagugu qori doonaa Qabiir Daryeel Aqoonsi oo kaala shaqayn doona kaas oo kaala shaqayn doona magacaaga si dhaqsi ah loo joojiyo oo soo celiyo waxyeelada.

Sidoo kale waa inaad ogaataa inaad xaq u leedahay warbixin aad booliiska u soo gudbiso haddii aad waligaa la kulanto khiyaamo aqoonsi (identity fraud). Fadlan waxaad oggaataa in si aad u soo gudbiso warbixinta dembiga ama warbixin dhacdo oo aad u soo sheegto waaxda sharci fulinta ee wixii xatooyo aqoonsi oo dhan, waxay u badan tahay inaad u baahato inaad keento nooc caddayn oo ah inaad dhibbane ahayd. Warbixin booliis ayaa inta badan loo baahan yahay si aad uga dodo waxyaabaha been abuurka ah. Dhacdooyinka tuhunka ee xatooyi aqoonsi waxaad u sheegi kartaa hay'adaha fulinta sharciga ama Xeer Ilaaliyaha Guud.

**5. Khiyaanada Ku Wargeli** saddexda shirkadood ee xafiiska kareeditka (credit bureaus). Haddii aad doorato inaad ku wargeliso digniinta khiyaanada, waxaan kugula talineynaa inaad tallaabadan qaado ama sameyso ka dib markaad samayso la socoshada kareedkaaga. Digniinta khiyaanada waxaad ku wargelin kartaa mid ka mid ah seddexdan shirkaddood ee kareeditka adiga oo u waca iyo sidoo kale booqdo bogga interneetka ee Experian's ama Equifax. Digniinta khiyaanada waxay shirkaddaha deynta ku wargelinnaysaa inay raacaan hanaano qaarkood, oo ay ka mid yihiin in adiga ay kula soo xiriiraan ka hor inta aanay furin koonto cusub ama aanay bedelin akoonnadaada hadda kuu furan. Sababtaas darteed, digniin dhigista khiyaanada way ku ilaalin kartaa, laakiin sidoo kale waxay dib u dhigi kartaa markaad rabto inaad deyn hesho. Macluumaadyada halka aad kala xiriirayso dhammaan saddexda xafiis waa sida soo socota:

**Xafiiska Deynta (Credit Bureaus)**

| | | |
|---|---|---|
| Equifax Fraud Reporting | Experian Fraud Reporting | TransUnion Fraud Reporting |
| 1-866-349-5191 | 1-888-397-3742 | 1-800-680-7289 |
| P.O. Box 105069 | P.O. Box 9554 | P.O. Box 2000 |
| Atlanta, GA 30348-5069 | Allen, TX 75013 | Chester, PA 19022-2000 |
| www.equifax.com | www.experian.com | www.transunion.com |

Waxaa lagama maarmaan ah in aad la xiriiro MID kaliya oo ka mid ah shirkaddaha oo hannaankan aad isticmaasho. Isla marka ay seddexda xafiis ee ay xaqiijiyaan ku wargelinta khiyaanada, oo kuwa kalena waxaa lagu wargelinayaan inay iyaguna sidoo kale dhigaan digniinaha. Weli waxaad heli doontaa waraaqaha xaqiijinta boostada ka dibna waxaad awooddi doontaa inaad dalbato dhammaan saddexda warbixinood ee kareedit (credit reports), iyada oo bilaash ah, si aad indhaha u mariso. Digniinta hore waxay socon doontaa ilaa iyo hal sano.

**Fadlan ogsoonow: Ma jirto qof loo oggol yahay inuu wargelin khiyaano kareeditkaaga soo gudbiyo adiga aanan ka ahayn.**

**6. Ammaan Joojin (Security Freeze).** Adiga oo xannibaad ku sameeya, qof si khiyaano ah ula wareegaya xogtaada aqoonsiga shaqsi ma awoodi doono inuu macluumaadkaas isticmaalo si uu u furto koonti cusub ama magacaaga ku amaahdo lacag. Waxaad u baahan doontaa inaad la xariirto saddexda xafiis ee warbixinta deynta qaranka ee kor ku qoran si kareeditkaaga xannibaad u geliso. Waxaad maanka ku haysaamarka xogtaada xannibaad aad geliso, ma awooddi doontid in lacag aad soo amaahato, aad hesho kaarka deynta (credit credit), ama aadan heli karin kaarka deynta ee cusub ilaa inta xannibaadda aad si ku meel gaar ah u qaaddo ama aad si joogto ah uga saarto maahane. Ma jiro wax kharash ah ee lagaa qaadayo in xannibaad aad feelashaada kareeditka geliso.

**7. Waxa aad heli kartaa macluumaad dheeraad ah** oo ku saabsan tillaabooyinka aad qaadi karto si aad uga fogaato xatooyada aqoonsiga ee hay'adaha soo socda. Sidoo kale Guddiga Ganacsiga ee Federaalku (Federal Trade Commission) waxay ku dhiirigeliyaan dadka ogaaday in si khaldan loo isticmaalay macluumaadkooda inay iyaga cabasho u soo gudbiyaan.

**Macluumaad Dheeraad Ah**

Si aad wax dheeraad ah uga barato mowduucyadan iyo hay'adaha la socodka deynta, la xiriir Guddiga Ganacsiga Federaalka, ama Xeer Ilaaliyaha Guud ee gobolkaaga.

- Guddiga Ganacsiga Federaalka waxa lagala xiriiri karaa: 600 Pennsylvania Avenue NW, Washington, DC 20580; www.identitytheft.gov; 1-877-ID-THEFT (1-877-438-4338); iyo TTY: 1-866-653-4261.
- Guddiga Ganacsiga Federaalka sidoo kale wuxuu dhiirrigelinayaa kuwa ogaada isticmaalka xogtooda si khaldan inay dacwad u gudbiyaan.
- Waxaad xaq u leedahay inaad gudbiso warbixin booliis haddii aad abid la kulanto xatooyo aqoonsi ama khiyaano. Fadlan ogow inaad u baahan tahay inaad bixiso caddayn ah inaad tahay dhibane si aad u gudbiso warbixin laamaha sharciga ee ku saabsan xatooyada aqoonsiga. Dhacdooyinka xatooyada aqoonsiga ee la ogyahay ama laga shakiyo waa in sidoo kale loo sheegaa laamaha sharciga iyo Xeer Ilaaliyaha Guud ee gobolkaaga. Ogeysiiskan dib uma dhicin amar kaga yimid laamaha sharciga.

*Dadka deggan Degmada Columbia,* Xeer Ilaaliyaha Guud ee Degmada Columbia waxaa lagala xiriiri karaa: 400 6th Street, NW, Washington, DC 20001; 202-727-3400; iyo oag.dc.gov.

*Dadka deggan Maryland,* Xeer Ilaaliyaha Guud ee Maryland waxaa lagala xiriiri karaa: 200 St. Paul Place, 16th Floor, Baltimore, MD 21202; 1-410-528-8662 ama 1-888-743-0023; iyo http://www.marylandattorneygeneral.gov/. Advantage waxaa laga helaa 4635 Southwest Freeway, Suite 750, Houston, TX 77027.

*Dadka deggan New Mexico,* waxaad xaq u leedahay xuquuq sida ku xusan Sharciga Warbixinta Deynta Caddaaladda, sida xuquuqda lagu ogeysiiyo haddii macluumaadka ku jira faylkaaga deynta loo adeegsaday kaaga soo horjeeda, xuquuqda aad ku ogaan karto waxa ku jira faylkaaga deynta, xuquuqda aad ku codsan karto dhibcahaaga deynta, iyo xuquuqda aad ku diidi karto macluumaadka aan dhameystirneyn ama khaldan.

Intaa waxaa dheer, sida ku cad Sharciga Warbixinta Deynta Caddaaladda, wakaaladaha warbixinta macaamiisha waa inay saxaan ama tirtiraan macluumaadka khaldan, aan dhameystirneyn, ama aan la xaqiijin karin; hay'adaha warbixinta macaamiishu ma soo sheegi karaan macluumaadka xun ee dhacay; helitaanka faylkaaga waa xadidan yahay; waa inaad ogolaansho bixisaa si warbixinta deynta loogu gudbiyo loo-shaqeeyaha; waxaad xadidi kartaa dalabyada “hore loo sii eegay” ee deynta iyo caymiska aad ku hesho iyada oo lagu saleynayo macluumaadka ku jira warbixintaada deynta; waxaadna raadin kartaa magdhow ka yimaada qofka xadgudubka sameeya. Waxaa laga yaabaa inaad leedahay xuquuq dheeraad ah oo hoos yimaada Sharciga Warbixinta Deynta Caddaaladda oo aan halkan lagu soo koobin. Dhibanayaasha xatooyada aqoonsiga iyo shaqaalaha milatariga ee firfircoon waxay leeyihiin xuquuq dheeraad ah oo gaar ah sida ku cad Sharciga Warbixinta Deynta Caddaaladda. Waxaan ku dhiirrigelineynaa inaad dib u eegto xuquuqdaada sida ku cad Sharciga Warbixinta Deynta Caddaaladda adiga oo booqanaya www.consumerfinance.gov/f/201504_cfpb_summary_your-rights-under-fcra.pdf, ama adiga oo qoraya Xarunta Jawaabta Macaamiisha, Qolka 130-A, Guddiga Ganacsiga Federaalka, 600 Pennsylvania Ave. N.W., Washington, D.C. 20580.

*Dadka deggan New York,* Xeer Ilaaliyaha Guud ee New York waxaa lagala xiriiri karaa: Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud, The Capitol, Albany, NY 12224-0341; 1-800-771-7755; ama https://ag.ny.gov/.

*Dadka deggan North Carolina,* Xeer Ilaaliyaha Guud ee North Carolina waxaa lagala xiriiri karaa: 9001 Mail Service Center, Raleigh, NC 27699-9001; 1-877-566-7226 ama 1-919-716-6000; iyo www.ncdoj.gov.

*Dadka deggan Rhode Island,* Xeer Ilaaliyaha Guud ee Rhode Island waxaa lagala xiriiri karaa: 150 South Main Street, Providence, RI 02903; www.riag.ri.gov; iyo 1-401-274-4400. Iyada oo qayb ka ah sharciga Rhode Island, waxaad xaq u leedahay inaad hesho wixii warbixin booliis ah ee la xiriirta dhacdadan. Waxaa jira 67 qof oo reer Rhode Island ah oo saameysay dhacdadan.